

مسارات
خيرية

CHARITABLE
PATHS

Tirsiga (18) Feb 2023



“

**HADYADDA MAALINTA QARANNIMADA KUWEYT:
4000 OO QOF OO SOOMAALIYEED AYAA AY UGU
DEEQDAY ADEEGYO CAAFIMAAD OO BILAASH AH**

”





SI AAD U AKHRIDO FAAHFAAHINTA WARKA, GUJI CINWAANKA



03



**Mashaariicda
biyaha iyo
Fayadhowrka
deegaanka**



05



**Adeegyada Iyo
Hawlaha Samafal
Ee Caafimaadka**



07



**Mashaariicda
Waxbarashada**



10



**Mashaariicda
Tababarrada Iyo
Tayeynta**



12



**Xidhiidhada
Guud**



14



Aqoon & Ogaal



**مسارات
خيرية** CHARITABLE
PATHS



جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society

Address: Barbera Road - Hargeisa
Mobile: +252633278256
Phone: +252514333
Website: www.arcsom.org

WAA DHANBAAL BILLE AH OO HAY,ADDA
GARGAARKA AFRICA (A.R.C) AY KAGA
WARRANTO MASHAARIICDEEDA
HORUMARINEED IYO BANI-AADAMNIMO .

TIRSIGA (18) FEB 2023



MASHAARIICDA BIYAHA IYO FAYADHOWRKA DEEGAANKA



ARC Oo Xadhiga Ka Jartay 9 Ceelbiyood



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa hawlgelisay 9 ceel booyod oo ay ka qodday deegaanno kala duwan. Ceelashan oo wadartoodu ay awood u leedahay in ay daboolo baahiyaha biyood ee in ka badan 4200 oo qof iyo xoolahooda, afar ka mid ah waxa ay ka qodday deegaannada ku dhow magaalada Jowhar ee xarunta dawladgobaleedka Hirshabeelle, halka Afar ceel oo kale ay ka qodday deegaannada Marka iyo Afgooye ee shabeelaha hoose, Koonfur-galbeed - Soomaaliya, ceelka soo hadhayna ay ka hirgelisay deegaanka magaalada Dacar-budhuq ee gobalka Maroodijeex, Somaliland.

Ceelashan waxaa loo dhammaystiray kaabayaasha aasaasiga ah ee ay ka mid yihiin daboolka sabadda ah, darka ay xooluhu ka cabayaan iyo waadaanta biyaha ka soo saaraysa.

Qodaalka ceelashan ayaa qayb ka ah mashaariicda biyaha ee ARC oo ka wakiil ah hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA - Kuweyt, ay ka fuliso deegaannada kala duwan ee Geeska Afrika. Taas oo ujeeda-deedu ay tahay in ay gacan ka geysato daboolista baahiyaha biyo yaraanta ee inta badan soo waajaha qoysaska saboolka ah ee ku dhaqan dhulka oomanaha ah, gaar ahaan xilliyada abaaraha.





ARC Ayaa Dhammaystirtay Mac-hadka Farsamada Gacanta Ee Burco



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa dhammaystirtay dhismaha iyo qalabaynta mac-hadka tababarka farsamada gacanta oo ay ka hirgelisay magaalada Burco, Somaliland. Mac-hadkan ayaa ka kooban qaybaha barashada xirfadaha Korontada iyo tamarta laga dhaliyo qorraxda, tumaalka birta iyo Laxaamadda, Alamuuniyaamta iyo rakibista quraaradda, Nijaaradda iyo samaynta qalabka guryaha iyo xafiisyada. Mac-hadkani waxa uu ku soo biirayaa mac-hadyada farsamada gacanta ee ay hore hay'addu uga hirgelisay magaaloyinka Hargeysa iyo Boorama ee Somaliland. Waxa aanay ujeedadoodu tahay in la helo, dhalinyaro leh xirfadahan muhiimka u

ah horumarka dhaqaalaha, maadaama oo ay kordhinayso awoodda iyo tayada wax-soosaarka bulshada, iyo in ay fursado ka helaan suuqa shaqada. Taas oo qayb muhiim ah ka noqonaysa dadaallada shaqo abuurka.

Mac-hadyada waxbarashada farsamada gacanta ee ay ARC ka hirgelisay Somaliland, waxa ay isugu jiraan qayb loogu talagalay tababarrada muddada gaaban ah iyo qayb waxbarashada dugsiyada sare ee farsamada gacanta ah. Mac-hadyadan waxa maalgelisay hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA, Kuweyt.



ADEEGYADA IYO HAWLAHA SAMAFAL EE CAAFIMAADKA

**HADYADDA MAALINTA QARANNIMADA KUWEYT:
4000 oo qof oo Soomaaliyeed ayaa ay UGU DEEQDAY adeegyo
caafimaad**



Hay'adda Gargaarka Afrika oo ah wakiilka Geeska Afrika ee hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA ayaa fulisay, olole adeegyo caafimaad oo lacag la'aan ah lagu gaadhsinayo in ka badan 4000 oo ka mid ah dadka saboolka ah ee ku dhaqan deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.

Dhakhaatiir takhasusyo kala duwan ah oo ka socotay cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa, ayaa adeegyadan ka fuliye deegaannada Hargeysa iyo Boorama ee Somaliland, Jigjiga ee dawlad deegaanka Soomaalida iyo Garowe, dawlad-gobaleedka Soomaaliya ee Puntland.

Ololahan ayaa ahaa mid lagu xusayo mu-naasabadda maalinta Ciidda qaranka ee dalka Kuweyt oo ku beegan 25 ka Febbarweri, waxa aanu ka turjumayey kaalinta sare ee uu dalka Kuweyt kaga jiro hawlga-ha bani'aadamnimada ee dunida oo dhan, iyo gaar ahaan mashaariicda iyo Barnaamijyada samafal iyo horumarineed ee uu ku kaalmeeyo dhulka Soomaalida.

Dhakhaatiir takhasusyadooda ay ka mid yihiin uur-ku-jirta, cudurrada lala noolaa-do ee ay ka mid yihiin wadne xanuunka, macaanka iyo dhiigkarka, cudurrada Haweenka, iyo carruurta ayaa kulamo xaalwaraysi iyo la talin ah la yeeshay boqollaalkan Bukaanka ah, iyaga oo xaaladaha fudud u qorayey shaybaadhada iyo dawooyinka ay u baahan yihiin oo ay hay'addu lacag la'aan ku bixinaysay, halka xaaladaha culusna ay u dirayeen cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa oo ka mid ah cisbitaallada ugu takhasuska badan, uguna qalabka casrisan Somaliland.

Cisbitaalkan ayaa ka mid ah mashaariicda caafimaadka ee ay hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ka fuliso Geeska Afrika, waxaana maalgelisay hay'adda ALRAXMA ee dalka Kuweyt. Masuuliyiinta ARC oo ka hadlay ololahan caafimaad ee lagu beegay xuska maalinta qarannimada Kuweyt, ayaa si gaar ah tahniyad iyo bogaadin ugu diray dawladda Kuweyt iyo dadkeeda.



ARC Oo Muqdisho Ka Fulisay Ololaha La Dagaalanka Indha La'aanta



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa magaalada Muqdisho ee caasimadda Soomaaliya ka fulisay, olole lagula dagaalamayo indha la'aanta iyo xanuunnada indhaha ku dhaca. Dhakhaatiir takhasus u leh caafimaadka indhaha ayaa fadhiyo waraysi iyo la talin ah la yeeshay bukaan badan oo ka cabanayey indhaha, iyaga oo shaybaadhis iyo daweyn u sameeyey, 11 ka mid ah oo xaaladdoodu qalliin ahaydna indhaha u jeexay. mashruucan caafimaadka indhaha iyo la

dagaalanka indha la'aantu waxa uu qayb ka yahay, barnaamijyada samafalka caafimaadka iyo hawlaha bani'aadamnimo ee ay hay'adda Geeska Afrika ka waddo guud ahaan dhulka Soomaalida ee Geeska Afrika, iyada oo maalgelin iyo taageero ka helaaysa hay'adda Caalamiga ah ee Al-Raxma ee dalka Kuweyt. Waxa aanay ujeeddadiisu tahay in adeegyo caafimaad oo lacag la'aan ah la gaadhsiiyo dadka saboolka ah ee aan awoodi karin in ay iska bixiyaan kharashaadka caafimaadka.



MASHAARIICDA WAXBARASHADA

ARC Ayaa Xadhiga Ka Jartay Xarun Cusub Oo Lagu Xiftiyo Qur'aanka



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa xadhiga ka jartay xarun lagu xiftiyo doono Qur'aanka Kariimka ah oo ay ka hirgelisay, xeerada barakacayaasha ee, gobalka Ma-roodijeex.

Xaruntani waa tii lixaad ee xarumaha ay hay'addu ugu magacdartay 'Bil Qur'aani Naxfithum', waxa aanay ka koobantahay laba fasal waxbarasho oo loo dhammaystiray qalabkii iyo kaabayaashii waxbarasho ee lagama maarmaanka ahaa. Sida kutubta Qur'aanka ah, Rixliga la saarto kutubta, Sabuurado, sijaayado, iyo Suuliyo.



Xaruntu waxa ay ku fadhidaa dhul cabbirkiisu dhan yahay 50 mitir oo laba jibbaaran, waxa aanay halkii mar qaadi karaysaa boqol arday.

Xarumahan ayaa ay ujeedadoodu tahay in ay kaalin ka qaataan Barbaarinta ardayda, iyo Barashada Qur'aanka Kariimka ah, iyo sida oo kale waxbarashada dadka waaweyn iyo in ardayda loogu diyaariyo ku biirista waxbarashada rasmiga ah. Waxaa mashruucan gacan ka geysata hay'adda caalamiga ah ee ALRAXMA, Kuweyt.



600 oo agoon ah ayaa looga faa'ideeyey Xoolo qalliin ah



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa fulisay Mashruuc qalliinka xoolo sadaqad iyo wajibaad kala duwan ah, oo ay bixiyeen dad muslimiin ahi. Mashruucan waxa ay hay'addu ka fulisay Somaliland, magaalooyinka Hargeysa, Burco iyo Borama, Soomaaliya magaalada caasimadda ah ee Muqdisho iyo magaalada Garowe ee xarunta dawlad gobaleedka Puntland ee Soomaaliya. Xolaha la qalay waxa ay ahaayeen 52 neef oo adhi ah, waxaana hilibkooda lagu quudiyey carruurta agoonta ah ee lagu daryeelo

xarumaha waxbarashada ee ay hay'addu ku leedahay magaalooyinka aynu xusnay. Mashruucani waxa uu qayb ka ahaa Barnaamijyada dhianca gargaarka iyo horumarinta bulshada ee ay hay'adda ARC ka fuliso, deegaanada kala duwan ee Soomaalidu ay ka degto gobalka Geeska Afrika. Waxa aanay ujeedada barnaamijku tahay in carruurta agoonta ah ee lagu daryeelo xarumahani ay helaan cunto tayo leh oo ay ka heli karaan nafaqada ay u baahanyihiin.



Kulanka Macallimiinta Iyo Waalidiinta Dugsiyada Xarunta Kuweytiga



Maamulka qaybta Hablaha ee dugsiyada Kuweytiga magaalada Hargeysa, iyo masuuliyiinta mashaariicda waxbarashada ee hay'adda Gargaarka Afrika - ARC ayaa kulan muhiim ah la qaatay waalidiinta ardayda. Waxaa lagu gorfeyey waxbarashada iyo anshaxa ardayda, iskaashiga waalidka iyo macallinka iyo guud ahaan dugsiya, guulaha illaa hadda la gaadhay, iyo halka ay tahay in looga sii socdo si looga midho dhaliyo himilooyinka fog.

Maamulka dugsiyada iyo masuuliyiinta waxbarashada ee ARC ayaa waalidiinta xog fiican ka siiyey arrimahaas, iyaga oo hoosta ka xariiqay higsiga ay dugsiya iyo hay'adduba leeyihiin iyo iskaashiga ay uga baahan yihiin waalidka ardayda. Waalidiintuna u'aalaha ay qabaan ayaa

ay weydiiyeen maamulka, waxa aanay u soo jeediyeen talooyinka u muuqda. Xubno u hadlay waalidka ayaa macallimiinta iyo maamulka uga mahadnaqay dadaalkooda ku aaddan waxbarashada ardayda, iyaga oo hay'addana ku bogaadiyey dadaalka ay ku diyaarisay jawi ku habboon waxbarasho, iyo tayeynta heerka waxbarasho iyo barbaarineed ee ardayda.

Rajab Ismaaciil, maamulaha qaybta Hablaha ee dugsiyada Kuweytiga oo kulanka ka hadlay ayaa, waalidka uga warramay siyaasadaha waxbarasho iyo barbaarineed ee u dejisan, iyo qorshayaasha kor loogu qaadayo tayada waxbarashada. waxa aanu waalidka uga mahadnaqay iskaashiga joogtada ah ee ay la leeyihiin dugsiyada.



MASHAARIICDA TABABARRADA IYO TAYEYNTA HAWLWADEENNADA ARC

ARC Iyo Wasaaradda Diinta Iyo Awqaafta Oo Kulan Aqooneed Isugu Keenay Ducaadda Iyo Kadiibyada Masaajidda Dalka



Hay'adda Gargaarka Afrika - ARC iyo wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha diinta ee Somaliland ayaa wadajir kulan aqoon-korodhsi iyo kala faa'idaysi ah isugu keenay, 120 ka mid ah culimada khudbadda jimcaha ka akhrida Masaajidda Hargeysa (Khadiibyada) iyo culimada dadka diinta ugu baaqa (Ducaadda).

Barnaamijkan oo ay maalgelisay hay'adda caalamiga ah ee Al-Raxma ee dalka Kuweyt, waxa ay ujeeddadiisu ahayd kobcinta iyo tayeeynta xirfadaha khadiibyada iyo ducaadda ee dhinacyada; aqoonta shareecada, habka diyaarinta iyo jeedinta khudbadda iyo wacdiga si ay noqdaan kuwo raad togan ku yeesha quluubta dhegeystayaasha, qiyamka Islaamiga ah ee looga baahan yahay shakhsiga dadka diinta ugu yeedhaya, muhiimadda ay khudbadda iyo wacdigu ku leeyihiin kor u qaadista wacyiga diiniga ah ee bulshada, isku baraarujinta kaalinta ay khadiibyada iyo ducaaddu ku leeyihiin wanaajinta iyo dib u habaynta dhaqannada bulshada, iyo in la muujiyo dhexdhexaadnimada ay shareecada Islaamku dhiirrigelisay in lagaga badbaado ku talaxtagga ama gaabiska marar badan yimaadda.

Kulankan waxaa casharro iyo khudbado aqooneed ka jeediyey Muftiga guud ee Jamhuuriyadda Somaliland Sheekh Maxamed Sheekh Cumar Dirir, iyo qaar ka mid ah culimada

waaweyn ee dalka.

Wasiirka diinta iyo awqaafta Somaliland mudane Sheekh Cabdirisaaq Xuseen Cali (Albaani) oo ka hadlay kulanka ayaa hoosta ka xariiqay, muhiimadda ay leedahay in culimadu ay xoo-gga saarto doorashada mawaadiicda ku habboon xaaladaha iyo duruufaha bulshada ka dhex jira, iyo in ay u soo diyaariyaan si cilmiyeysan oo ka turjumi karta dhibirsanaanta iyo dhexdhexaadnimada Islaamka.

Wasiirku waxa uu ka soo qaybgalayaasha kula dardaarmay in ay dhaqangeliyaan aqoonta iyo xirfadaha ay korodhsadeen, muddadii labada maalmood ahayd ee uu kulanku socday. Isaga oo sheegay in ay taasi dawo ka noqon karto dhaqannada taban iyo anshax darrooyinka laga yaabo in ay bulshada soo dhexgalaan.

Muftiga guud ee Somaliland Sheekh Maxamed Sheekh Dirir oo casharro muhiim ah ka jeediyey kulanka, ayaa sheegay in ay muhiimadda koowaad ee khudbadda jimcuhu ay tahay in dadka qalbigooda la baraarujiyo, aakhiro la xsuusiyo, walaaltinimo iyo jacaylna lagu beero. "Waa in hadalka uu Sheekhu jeedinayaa ay noqdaan kuwo qofka ku jihaynaya khayrka iyo samaha" ayaa ka mid ahayd hadallada sheekha.

Ku xigeenka duqa caasimadda Mudane Khadar Axmed Cumar oo kulanka hadal bogaa-din iyo soo dhoweyn ah ka jeediyey, waxa uu hoosta ka xariiqay doorka muhiimka ah ee ay culimada diintu ugu jiraan umadda. Kaas oo uu sheegay in uu yahay dhismaha bulshada.

Mudane Cali Maxamed Warancadde, lataliyaha madaxweyaha ayaa isaguna bogaadiyey hay'adda ARC iyo wasaaradda diinta iyo Awaqta ee kulankan soo agaasimay, waxa aanu sheegay in kulamadani ay muhiim u yihiin sidii dalka iyo dadkaba loogu ilaalin lahaa diinta Islaamka, manhajka wanaagsan ee Alle jeexayna loogu hanuunin lahaa.

Dhinaca kalana, guddoomiyaha hay'adda Gar-gaarka Afrika ee ARC, Dr. Cabdiraxmaan Muca-llimi oo isaguna kulanka hadal ka jeediyey ayaa iftiimiyeey, masuuliyadda culus ee khadiibyada

iyo ducaadda saaran, maadaama oo ay la ma-caamilayaan dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada. Waa uu tilmaamay in ay lagama maarmaan tahay in khadiibka iyo daacigu ay fahmaan waaqaca cusub ee dunida maanta ka jira iyo raadka uu leeyahay. Isaga oo dhanka kalana ka warramay mashaariicda iyo Barnaa-mijyada ay hay'adda ARC ka qabato dalka, iyo waxqabadyada la taaban karo ee ay hirgelisay.

Waxa kale oo kulankan hadallo ka jeediyey marti sharaf ka soo qaybgashay furitaankii iyo xidhitaankii kulanka, kuwaas oo isugu jiray ma-suuliyiin dawladeed, aqoonyahanno, masuuliyiinta hay'adda ARC iyo haldoor kale. Gebge-badii kulankana waxaa ka soo qaybgalayaasha la guddoonsiiyey, shahaadooyin muujinaya duruusta iyo tababarrada muhiimka ah ee ay qaateen.





ARC oo heshiis isfaham la saxeexatay xukuumadda Somaliland



Wasaaradda qorshaynta iyo horumarinta qaranka ee Somaliland iyo hay'adda Gargaarka Afrika - ARC oo ka wakiil ah hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA, Kuweyt ayaa kala saxeexday heshiis is faham oo la xidhiidha xoojinta iskaashiga labada dhinac, mashaariic iyo barnaamijyo samafal iyo horumarineed oo ay ARC ka fuliso guud ahaan dhulka Somaliland, iyo in labada dhinac ay iska kaashadaan fududaynta hirgelinta hawlaha lagama maarmaanka u ah

rumaynta gaadhitaanka yoolasha iyo istaraatiijiyadaha ay wadaagaan.

Wasiirka wasaaradda qorshaynta iyo horumarinta Qaranka Somaliland, Dr. Axmed Aadam Buuxane ayaa heshiiska u saxeexay xukuumadda, halka dhinaca hay'addana uu saxeexay guddoomiyaha guud ee ARC Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi.

Masuuliyiinta ARC Oo Tacsi U Tegey Qunsuliyadda Turkiga Ee Somaliland



Maamulka sare ee hay'adda Gargaarka Afrika - ARC oo ah wakiil Geeska Afrika ee hay'adda caalamiga ah ee Al-Raxma Kuweyt ayaa tacsi u tegey qunsuliyadda Turkiga ee Somaliland.

Masuuliyiintan oo uu horkacayey guddoomiyaha hay'adda ARC, iyaga oo ka xun khasaaraha ummadaha Turkiga iyo Suuriya ka soo gaadhay dhulgariirkii baaxadda lahaa, waxa ay qunsulka, halwadeennada, dawladda iyo guud ahaan umadda Turkiga ka tacsiyadeeyeen khasaaraha naf iyo moodba leh ee ka dhashay.

Masuuliyiinta ARC ayaa qunsulka iyo hawlwaadeennada ku qaabilay qunsuliyadda Turkiga ee magaalada Hargeysa, waxa ay la wadaageen dareenkooda murugo, iyaga oo Alle ka baryey in inta ku shahiiday masiibadaas uu naxariistiisa ku janno geeyo, dhaawaca iyo inta dhibaatada kale ka soo gaadhayna uu caafimaad dhaqso ah iyo ka soo kabasho ku gallado.

Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi, guddoomiyaha ARC ayaa buugga tacsida ku saxeexay magaca ARC iyo hay'adda ay Geeska Afrika wakiilka uga tahay ee ALRAXMA Kuweyt, isaga oo sida oo kalana dhambaalka tacsida ah guddoonsiiyey qunsulka danjire Haaruun Arsalaan.

Qunsulka ayaa isagu dhinaciisa waxa uu waf-tiga ARC uga mahadnaqay gudashada waajibbaadka tacsida ee ay ugu yimaaddeen iyo dareenka ay u muujiyeen sida ay shacabka Turkiga iyo Suuriyaba ula qaybsanayaan xanuunka ka dhashay aafada dhacday. Sida oo kalana oo kalana mahadnaq ballaadhan ayaa uu u sii mariyey hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, iyo guud ahaan shacabka Kuweyt oo uu sheegay in ay gargaar iyo gacan walaanimo ka geysteen deegaannada uu dhulgariirku khasaaraha gaadhsiiyey.





Xoree Go'aankaaga

Dabecadda aadamaha ayaa ah in uu go'aamo iyo aragtiyo ka qaato dad aanu laba kulmin, balse warkooda uu cid kale ka helay iyo in uu ka joogsado hawlo uu qaban lahaa, isaga oo keliya ku go'aan qaatay war taban oo cid kale uga sheegtay hawshaas.

In aynu dadka isu dhegeysanno, kuna qanacno xogta uu qofku cid kale ka sheegayaa, waxa ay abuuraysaa in aynu kala go'no bulsho badan, iyo in aynu go'aamo ka fogaanshiyo ah ka qaadanno qof la inooga sheegay xog, iyada oo suurtagalba ah in aanay xogtaasi sax ahayn. Waxaa in badan dhacda in ay isbeddesho aragtida taban ee aynu qofka ka haysannay barashada horteed, marka aynu is baranno ee uu macaamil ina dhex maro qofkaas. Sababtaas ayaa ay u fiicantahay in aynaan qofka kaga go'aan qaadan xogta cid kale inooga imanaysa.

Barashada qofka oo keliya ma'aha, waxa kale oo dhacda in xogta taban ee aynu ka helayno dadku, ay noqoto teed innaga joojiya ka shaqaynta hawl iyo Mashruuc muhiimad inoo lahaa, iyo in aynu rumayno riyadeenna. Waxaa muhiim ah in aynu ku dadaalno in xogta aynu dadka ka helayno iyo xitaa mararka qaarkood aqoon iyo xog aan sal adag ku taagnayn, ama ismoodsiiskeennaba aynu kaga joogsanno ka midha dhalinta himiladeenna. Rumaynta riyadeenna iyo ka shaqaynta mashaariicda laga yaabo in ay maskaxdeenu ku fikirayso, taas oo haddii aynu si xeeldheer uga fikiri lahayn, ama marka hore lahaan lahayn awooddii iyo kartidii aynu si run ah ugu daraasayn lahayn mashruuca ama riyadaas, aynu arki lahayn wax

ka duwan waxa aynu marka hore ka malaysanaynay.

Qanaacada aynu cidlo ka qaadannaa waxa ay abuurtaa, in aynu dhibbane u noqonno waa-yoaragnimo ismoodsiis ah oo cid hore ku lu go'day, iyo ismoodsiisyo ka dhashay tijaaboo-yin cid kale hore ugu fashilantay. Iyada oo la-gaba yaabo in sababta fashilaaddu ay ahayd, ciddaas oo aan u diyaarsanayn ka midho dhalinta hawshaas, ama caqabado kale oo laga gudbi karayey oo ay xal u heliddooda ka gaabiyeen, ama iyaga qudhooda oo ku go'aan qaatay sheekooyinka dadka caadada ay u tahay in ay dhinaca taban ka eegaan arrimaha.

Habka ugu fiican ee aad isaga xorayn karto qanaacada tabani, waa in hawl kasta oo cusub oo aad gelayso ama niyadda ku hayso qabashadeeda aad ku qiimayso waayoaragnimada aad adigu leedahay, kartida iyo aqoonta caawinaya hawshaas ee kugu jirta, iyo in aad iskaa u lafagurto adiga oo aan si buuxda isugu hallaynayn, warka taban ee dadka kale, laakiin ka faa'idaysanaya waayoaragnimada guulaysatay iyo xogta ku dhisan xaqiiqada ee ay ka hayaan arrintaas.

Marka aynu soo koobno talada maqaalkani waa in aad xorayso qanaacadaada, hawlahaaga iyo rumaynta riyadaadana aad ku dhisto qanaacada togan ee aad adigu qabto ama la kulantay, haddii aanay jirin wax qanaacadaas dhaawacaya ama xog burinaysa oo aad hubto runnimadeeda. Si xun wax u araggu sun ka daran.

WhatsApp waxa ay soo kordhinaysaa adeeg baahi weyn loo qabay



Waxaa marar badan aynu dhibaato kala kulanaa qaladaad dhinaca qoraalka ah, ama higaadda kelmadaha ah oo inaga dhaca marka aynu qorayno farriimaha aynu ku dirayno WhatsApp ka. Waxaa qasab noqota in aynu farriinta oo dhan tirtirno, si qaladkaas aynu u saxno. Mararka qaarkoodna innaga oo aan jeclaysanayn qaladkaas, ayaa ay qasab noqotaa in aynu iska dhaafno. Haddaba waxa hadda muuqata in arrintaas xalkeedu soo dhowaaday. Shabakadda WhatsApp ayaa adeegyada qaybta qoraalka farriimaha ku soo daraysa batam cusub oo ogolaanaya in wax-ka-beddel aynu ku samayn karno qoraalka aynu dirnay.

Batamkan ay ku soo dartay qoraalka oo Afka Ingiriisiga lagu yidhaahdo 'Edit Button', waxa uu ogolaanayaa in farriinta aad wax ka beddeli karto muddo ku siman illaa 15 daqiiqo kaddib

marka aad dirto.

WhatsApp waxa ay adeeggan soo kordhisay, kaddib markii malaayiin dadka isticmaala ka mid ahi ay muddo dheer soo celcelinayeen codsi ay ku dalbanayaan, adeeg awood u siinaya wax ka beddelka iyo sixitaanka qaladaadka farriimaha ka gala.

Laakiin sida uu ku warramayo wargeyska 'Daily Mail' ee ka soo baxa dalka Ingiriiska, shirkadda WhatsApp weli si rasmi ah uma ay sheegin waqtiga ay adeeggan cusub hawlgelin doonto. Adeeggan marka la sii daayo, waxa uu macmiilku ku qasbanaan doonaa in uu dib u cusboonaysiiyo Barnaamijka WhatsApp ee ugu jira talefanka gacanta, si uu ugu soo dego Barnaamijka cusub ee wax ka beddelkani la socdaa.

Nabarrada Xafaayada Iyo Dawooda

CAAFIMAADKU WAA RAASAMAAL

Waxaa jira nooc xanuun maqaarka ah oo ka dhasha xafaayadda carruurta loo xidho. Waa gubasho iyo nabarro ku samaysma maqaarka ilmaha, tusaale ahaan dhiigroor (Casaan midabkiisu furanyahay), waxaa afka Ingiriisiga loo yaqaanaa 'Diaper Rash'.

Inta badan sababta keentaa waa maqaarka oo muddo ay ku xidhnaato xafaayad wasakhaysani. Qoyaankaas wasakhda ayaa meelaha ay jidhka ka gaadho iyo guud ahaan jidhka, waxa ay ku keenaysaa gubasho iyo nabarro yaryar.

Gubashadaas iyo nabarradaas ka samaysma xafaayadda qoyan waxaa ka dasha caabuq-fangi oo loo yaqaanno (Candida). Waxa uu nabarro gubashada oo kale ah iyo dhiigroor ku keena maqaarka, meelaha qaarna waxa uu ku keena nabarro mararka qaarkood jeermis yeesha.

Xeeldheereyaasha caafimaadku waxa ay xaqiijiyeen in carruurta naaska jaqda ay ku yaryihiin nabarrada, iyo gubashada ay xafaayadda qoyani maqaarka ku keento. Arrintan sababteedu waa tirada dheecaannada iyo maaddooyinka kale ee keenaya gubashada iyo nabarrada oo ku yar saxarada carruurta naaska jaqda.

Ka hortagga Nabarrada ay xafaayaddu jidhka ilmaha ku samayso oo mararka qaarkood noqda gubasho iyo boogo, waa xaalad laga hortegi karo ama ugu yaraan la yarayn karo fursadaha imaanshiyaheeda. Hababka ugu habboon ee loo mari karaana waa:

1. in la isticmaalo xafaayado ka samaysan walxo iyo cudbi awood u leh in ay nuugaan qoyaanka. Ka dheeroow isticmaalka xafaayadaha ka samaysan bacda ama uu cudbigu ku yaryahay iyo xafaayadaha sida surwaalka loogu xidho ilmaha ee qoyaanka haya.

2. in lagu dadaalo in si dhaqso ah ilmaha looga beddelo xafaayaddu marka ay qoydo. Daweynta Xalka ugu fiicani waa in la isticmaalo xafaayad tayo leh, dhaqso looga beddelo ilmaha, ama lagaba daayo inta ay nabarradu bogsanayaan. Waxa iyaduna muhiim ah in si dhibirsan loo dhaqo jidhka ilmaha ee meelaha ay xafaayaddu ku xidhantahay ama gaadho. Waxaa waalidka lagula talinayaa in uu isticmaalo saabuun iyo biyo, laakiin aanu saabuunta ku xoqin jidhka. Tallaabooyinkaas aynu xusnay ayaa inta badan ku filan bogsashada nabarrada ay xafaayaddu samayso.

Maaddo jidhka qoyaan u samaynaysa oo la isticmaalo ayaa iyaduna si weyn u caawisa in aanay nabarradu ku samaysmin iyo in ay dhaqso u bogsadaan, haddii ay samaysmaan. Dhiiqo ama xaydhaha ay ka mid yihiin sinkiga, faasliinta, ama xaydh kale oo leh faytamiinnada A iyo D ayaa iya-guna kaalin weyn ka qaadan kara bogsashada nabarrada xafaayadda.

Waxaa mararka qaarkood dhici karta in nabarradu ay gaadhaan heer ay u baahan yihiin in la isticmaalo kiriimada dawada ah ee ku lidka ah Fangiga, laakiin waa in marka hore dhakhtar lagala tashadaa oo uu caddeeyo in uu caabuq samaysmay.

وَأُزْلِفَتِ الْجَنَّةُ لِلْمُتَّقِينَ غَيْرَ بَعِيدٍ (31) هَذَا مَا تُوْعَدُونَ
لِكُلِّ أَوَّابٍ حَفِيظٍ (32) مَنْ خَشِيَ الرَّحْمَنَ الْبَاطِنَ وَالْغَيْبِ وَجَاءَ
بِقَلْبٍ مُنِيبٍ (33) ادْخُلُوهَا بِسَلَامٍ ذَلِكَ يَوْمُ الْخُلُودِ
(34) لَهُمْ مَا يَشَاءُونَ فِيهَا وَلَدَيْنَا مَزِيدٌ (35) سورة ق

Aayadaha 31 illaa 35 ee suuradda Qaaf ee Qur'aanka Kariimka ah, Allaah waxa uu ku sheegay in uu jannadii u soo dhoweeyey adoo-mihiisa Alle ka cabsiga badan ee diyaarka u ah in ay fuliyaan amarradiisa, kana dheeraadaan wixii loo diiday. Isaga oo u sheegaya in janna-daasi ay tahay abaalmarinta uu u ballanqaaday ciddii ilaalisa ee u noqota xuduudka Alle.

Waxa uu sheegay, qofka Alle ka cabsada marka uu kelidii yahay ee la yimaadda qalbi u diyaar ah in uu Alle adeeco, in uu nabadqab ku gelayo jannadaas oo uu ku waarayo. Isaga oo helaya waxa uu doono iyo dheeraad.

Waxa ay ina tusaysaa in qalbigu uu yahay halka uu Allah eegayo ee innaga qiimaynayo. Sida aynu ognahayna tiirarka limaanka iyo xeerarka diinta waxaa asal u ah in hawsha iyo samaha uu qofku samaynaya ay noqdaan kuwo qalbiga ka yimid, shaqada qalbigu daacad u qabtaana ay ka mid tahay waajibaadka ugu waaweyn ee qofka saaran iyo waxyaabaha ugu muhiimsan ee Alle uu ugu dhowaanayo.

Waa sababta uu Nebi Muxammed (SCW) u yidhi hadal macnihiisu yahay, "Jidhka waxaa ka mid ah waslad, haddii ay samaato uu jidhka oo dhami samaanayo. Haddii ay xumaatana uu jidhku dhammaantii xumaanayo. Wasladaas oo ah qalbiga"

Hawlaha qalbiga ee laga hadlayo waxaa ka mid ah, 'In Alle la jeclaado, in la tala saarto, in arrimaha lagu kacayo xagga Alle loola noqdo, lana waafajiyo shareecada iyo in iyada oo Alle laga cabsanayo, haddana laga rejo qabo, in diinta iyo cibaadada daacad loogu gaar yeelo, in lagu sabro amarradiisa, laga dheeraado waxa uu innaga reebay, laguna sabro qaddarka Alle, iyada oo weliba laga raalli yahay, laguna raalli yahay, iwm.

Waxaa muhiim ah in aynu ogaanno, shaqada



iyo samaha uu qofku ku kacayo oo dhan.

Sida uu asxaabigii weynaa ee Abu Hurayra (Alle ha ka raalli noqdo) ka soo weriyey nebi Muxamed, "Qalbigu waa boqorka jidhka, xubnaha kale oo dhamina waa sida askartii boqorka. Haddii uu boqortku wanaagsanaado, askartiisuna waa ay fiicnaan. Haddii se uu isagu xumaado, askartuna waa ay la xumaanaysaa" In Addoonnimada uu Alle innaga rabaa ay noqoto mid qalbiga ka soo go'day, ayaa ka weyn in ay noqoto mid ay xubnaha jidhka oo keliyi ka turjumaan. Tusaale ahaan in xubnuhu ay la yimaaddaan waajibkaadka iyo cibaadooyinka saaran, laakiin aanu qalbigu u jeedin ama daacad ka ahayn, waxa ay muujinaysaa in samaha uu falay aanu qiimo ka yeelanayn Alle agtiisa. Waxa aynu ku soo xidhaynaa ducada ah, "Allahayoow waxa aannu ku weydiisanaynaa qalbi cabsi iyo khushuuc leh, carrab digriga haya, iyo jidh ku sabra imtixaanka" Aamiin.



@africanreliefco



Address: Barbera Road - Hargisa

Mobile: +252633278256

Phone: +252514333

Website: www.arcsom.org

